

Barnaamijka Deeqda Ka Soo-kabashada Dhaqaale ee Maine

DHABBAHA LOO MARAYO SOOKABASHADA MAINE: Marka laga soo tago halista ku timaadda caafimaadka bulshada, safmareenka COVID-19 ayaa aasaasi ahaan beddelay jawiga meheradda adduunka, iyada oo sababay kala goyn daran oo isku xirnaanta saadka, hoos udhaca kharshaynta macmiilka, iyo khasaarooyin aan horay loo arag oo laga dareemay dhammaan waaxaha meheradaha oo dhan. Dhaqdhaqayada wax soosaarka Mareykankuna kama duwana, oo shirkadaha soodhawaynta, dalxiiska, tafaariiqlayda, maqaayadaha iyo baararka, madadaalada, warshadeynta iyo kuwa kale oo tiro badan ayay soo wajahaysaa dhibaatooyin caqabado cusub oo carqaladeeynaya hawlaha ooisku gudbaya koritaanka. Halkan oo ah Maine, xiritaanka xuduudda Kanada, joojinta maraakiibta tamashlaha, iyo ka maagashada dadku inay socdaalaan ayaa saamayn ku yeelatay dhaqaalaheenna, laga bilaabo beeraha illaa kaluumeysiga, illaa tafaariiqlayda, madaddaalada iyo qaybaha hoteellada iyo kuwa la mid ah.

Gobolka Maine wuxuu qorsheynayaa inuu u isticmaalo fuundaynta xeerka gargaarka CARES si looga caawiyo dhaqaalaheena inuu ka soo kabto saamaynta safmareenka adduunka oo dhan saameeyay iyada oo la taageero meheradaha salka ku haya Maine iyo ururrada samafalka oo loo maro Barnaamijka Deeqda Ka sookabashada Dhaqaalaha. Fuundaynta ayaa ka imanaysa Sanduuqa Gargaarka Coronavirus ee federaaliga ah oo waxaana lagu bixin doonaa qaab deeqo ah oo toos loogu culeyska looga qaadayo carqaladeynta howlgallada meheradaha yaryar ee Maine iyo samafalka awgeed safmareenka COVID-19. Waaxda Maine ee Dhaqaalaha & Horumarinta Bulshada ayaa si fiican ula shaqeyneysay ururrada Maine ee ay saameeyeen illaa billowgii qalalaasahan oo waxayna soo ururisay ra'yicelinno ka yimid dhammaan qaybaha kala duwan ee dhaqaalaha oo ku saabsan dhibaatooyinka hadda jira.

In badan oo ka mid ah meheradaha Maine iyo kuwa samafalka ah ayaa kari waayey inay marin u helaan ilaha dhaqaale ee hadda jira oo markaa “meel cidlo ku dambeeyay” una baahan caawimo si ay u sii jiraan. Qaar ka mid ah meheradahan ayaa ka soojeeda waaxaha dhaqaale ee waxyeelloyinka ugu badani ka soo gaadhay safmareenka adduunka, oo ay ku jiraan kuwo muddo dheer wali xiran, meherado aan wali dib loo furin, meherado ku tiirsan lacag xilliyo gaar ah soo gasha, iyo meherado dakhligoodu hoos u dhacay sababta oo ah dad wax iibsiga oo hoos u dhacay awgeed ama suuqyada adduunka oo hoos u dhacay. Barnaamijkan looguma talagalin inuu noqdo mid gaar ah oo wuxuu qirayaa in ku dhawaad qayb kasta oo qaybaha dhaqaalaha Maine ay soo martay hoos u dhac ku yimid dakhliga.

Lacagta laga heli karo deeqahani ayaan gabi ahaan beddeli karin ama dayactiri karin burburka dhaqaale ee u safmareenkani keenay. Hadakeena ciriiriga ahi waa inaan hubinno in doollar kastaa u ugu yaraan leeyahay saameyn yar, oo toos u taageera meheradaha Maine, ururrada samafalka Maine, iyo dhaqaalaha Maine.

HIMILOOYINKA BARNAAMIJYADA: Barnaamijkani wuxuu siiyaa deeqo meheradaha iyo ururrada samafalka ah ee muujiya baahi loo qabo gargaar dhaqaale oo ku saleysan khasaaraha

ku yimid ama kharashyada la xiriira carqaladeynta howlgallada meheradda ee ya sababay safmareenka COVID-19. Deeqaha ayaa loo qaybin doonaa iyada oo lagu saleynayo muujinta khasaaraha soo gaaray meheradda/ururka boqollayda siman (pro-rated) ee wadarta khasaaraha ay ka soo warbixiyeen codsadeyaasha uqalmaa.

Barnaamijkan looguma talagalin in lagu soo celiyo khasaarihi ku dhacay laakiin kaliya inuu ka caawiyo meheraduhu inay sii ahaadaan kuwo shaqaynaya. Barnaamijkan waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo xasilinta dhaqaalaha Maine iyo dardargelinta kala-guurka ka imanaya gargaarka muddada-gaaban illaa dib loo helo ku takhasuskii gobolkeenna ee ahayd Xeeladda Horumarinta Dhaqaalaha Maine ee 10-ka sanno, ee ku dhidbbaan hibada iyo casriyaynta.

Soo-raacin 1:

Shuruudaha U-qalmitaanka

Barnaamijka Deeqda Soo Kabashada Dhaqaale ee Maine ayaa loogu talagalay in lagu caawiyo u soocelinta khasaaraha ku dhacay natiijada tooska uga timid safmarka COVID-19 iyo flacelinta caafimaadka dadwaynaha ee la xiriirta. Meheraddada/ururka ayaa mas'uul ka ah wixii kasta si xun u isticmaalka lacagaha ah. Deeqdu waa dakhli cashuur laga qaadi karo oo la marin karo xisaabin.

- Kharashyada meheradda/ururka la soojeedinayo waxa ka mid noqon kara laakiin kuma xaddidna:
 - Kharashyada iyo qiimayaasha mushaharka;
 - Biximaha kirada ama moorgeejka ee goobaha meheradda (haddii aysan hase yeeshe ka dhaafin kireeye/amaahiye);
 - Biximaha adeegyada dhismaha (Utilities);
 - Iibsiga qalabka difaacitaanka shaqsiyeed ee ay u baahan tahay meheadd/ururku;
 - Qalab la xiriira meheradeedda;
 - Maalgashiyada taageeri doona jiritaanka muddada-dheer ee meheraddaada/ururkaaga;
 - Kharashyada ku baxay si dib loogu soobuuxiyo alaabada ama kharashyada kale ee dib-u-furista ee daruuriga ah; iyo
 - Kharashyada ku hawlgalintaanka hawlgalka daruuriga ah.
- Tusaalooyinka kharashyada aan la oggolaan karin waxa ka mid ah (liistadu gebi-ahaanba ma aha):
 - Kharashka qiima dhaca
 - Madaddaalada
 - U ololaynta
 - Agabyada iyo Adeegyada loogu talagalay Istimaalka Shaqsiyeed
 - Lacago Ku Xukun, Ganaaxyo, Burbur u Qabsasho iyo Heshiisyo Arrimo Dejin Kale
- Lacagaha waa in lagu kharash gareeyaa howlgallo si buuxda ugu xiran Maine.
- Deeqdan waxa loo tixgaliyaa inay tahay dakhli la soo sheegi karo; sidaas darteed, lacag bixinta laga helo deeqdan waa in lagu daraa dakhliga ay tahay in la sheego waqtiga cashuurta. Meheradaha ay khuseyso, Foomka 1099 ayaa la socon doonalacag kasta oo la bixiyo.

Si aad ugu-qalanto Deeqda Ka Soo-kabashada Dhaqaale ee Maine ee meheraddaada/ururkaagu waa inaad:

- Tusaalee baahida aad u qabtaan gargaarka lacageed ee ku saleysan dakhliyada lumay oo laga jaro kharashaadkii la galay tan iyo bishii Maarso 1, 2020 sababtuna ay tahay saameynta COVID-19 ama falcelinta la xiriira caafimaadka dadwaynaha;
- Tusaalee khasaaraha laga filayo khasaaraha 20% laga filayo ee lacageed oo laga gooyo kharashyada sannadka 2020;
- Waa inaad ahaato meherada macaash doon ah ama urur aan macaash doon ahayn, marka laga reebo:
 - Adeegyada Hawl-yaqaanimeed

- (Adeegyada Hawlyaqaanimo (Professional Services) ee leh koodhadhka NAIC ee ka bilaabma 5414, 5418 iyo 5419 ayaa u-qalma inay codsadaan)
 - 501(c)(4), 501(c)(6)
 - Dugsiyada K-12, oo ay ku jiraan kuwa jaartarka, kuwa dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay
 - Degmooyinka, xaafadaha degmooyinka, iyo hayadaha kale ee dowladda
 - Beelaha noolsha laga caaiyo iyo kuwa hawlgabka ah
 - Goobaha kalkaalinta-caafimaad ee muddada dheer
 - Uurrada iyo Ammaanooyinka sadaqada
 - Uurrada Meheradaha
 - Bangi iskaashato
 - Ammaanooyinka caymiska
 - Lacagaha iyo barnaamijyada deeqaha waxbarasho
 - Khamaarka
 - Madadaalada Qaangaarka
 - Naadiyada ururka golf-da, naadiyada golf-da, naadiyada kale ee gaarka loo leeyahay
 - Aaminnada iyo jamacyada xabaalaha
 - Uurrada walaaltinimada
 - Cisbitaalada, xarumaha kalkaalinta caafimadka, machadyada tacliinta sare, iyo ururrada daryeelka carruurta¹
 - Ku leh howlgallo muhiim ah Maine (meherad/urur saldhiggeedu tahay Maine ama leh ugu yaraan 50% ka mid ah shaqaalaha iyo shaqaalaha qandaraaska oo salka ku haya Maine);
 - Waxba aan lagaga lahayn dhammaan cashuuraha mushaharrada ee Gobolka Maine, cashuuraha iibinta, iyo cashuuraha dakhliga gobolka (siday kolba u khusayso) Julay 31, 2020;
 - Hawlgalayay ugu yaraan hal sanno kahor Ogast 1, 2020;
 - Meel fiican aad ka taagan Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha Maine;
 - Aanad kicin (khasaarin);
 - Aanad si joogto ah u joojin hawlgallada oo dhan;
 - Aad leedahay u hoggaansanaan waafaq leh oo aanad ku hoos jirin ficil meelmarin tallaabo fulin oo haatan ama mar hore ahayd oo laga qaaday Shuruudaha Liiska Hubinta Ka Hortagga COVID-19 (<https://www.maine.gov/decd/covid-19-prevention-checklists>); iyo
 - Aad shaqaalayso wadar guud oo ah 50 ama tiro ka yar oo ah shaqaale iyoshaqaale qandaraas sannadka 2020.
 - Haddii waqti kasta ha ahaate, gudahii 2020, meheraddaadu/ururkaagu ka badanaa 50 shaqaale iyo shaqaale qandaraasle, markaa uma qalantid (U tiri 1 shaqaale ama shaqaale qandaraas haddii ay shaqeeyaan, celcelis ahaan, ugu yaraan 30 saacadood oo hawlgudasho toddobaadkiiba ama 130 saacadood hawlgudasho bishiiba. U tiri 0.5 shaqaale kasta oo waqti-dhiman shaqeeya oo hadda shaqaalaysan, celcelis ahaan, ka yar kan).

¹ Maalgelinada kale ee laga heli karo Waaxda Waxbarashada iyo Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee cisbitaalada, goobaha xanaanada, ururada daryeelka ilmaha, iyo hay'ada waxbarashada sare.

Markay yihiin urunnada aan macaash doonka ahayn: Kaliya kafaala-qaatayaasha Dhaqaale (ururka xeraynaya Foomka 990 ama Foomka 990-EZ) ayaa uqalma inay codsadaan.

Kooxda ka kooban cidaha isku xiran waa inay gudbiyaan hal codsi oo kaliya. Fadlan isla socda hay'adaha cidaha kale ee aad isku xiran tihiin kahor intaydaan codsiga gudbin.

Iyado ujeedooyinka Deeqda Ka Soo-kabashada Dhaqaale ee Maine meheraddaada/ururkaaga ayaa loo qaddariyaa inay ku xiran yihiin meherad/urur kale oo:

1. Leh Aqoonsi Cashuur Bixiye Federaal oo isku mid ah (oo ay ku jiraan Lambarka Haqabbelka Bulshada (Soshaal Sekuriti))
2. Leh farac ama farac shishe isku mid ah
3. Badanaa u iska leeyahay/leeyihiin (in ka badan 50%) isla milkiile ama koox milkiileyaal ah
4. Loogu talagalay kuwa anaa Macaash-doonka ahayn: Ah shirkad hoosaad urur "farac" ah

Soo-raacin 2:

Maxaad u baahan doonto inaad dhammaystirto codsigan:

Waxaad u baahan doontaa macluumaadkan soo socda ee ku saabsan meheraddaada/ururkaaga (iyo dhammaan meheradaha/ururada ku xiran) ka hor intaadan bilaabin codsigaaga Deeqda Ka Soo-kabashada Dhaqaale ee Maine:

- Lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha Federaalka ama Lambarka Haqabbeelka Bulshada
- Nooca meherad/urur (macaash-ma-doon ama macaash-doon)
- Lambarka Nidaamka Lambarka Guud Ahaaneed (DUNS). Si aad u dejisato ama aad u xaqiijiso lamabarka DUNS, booqo <https://www.grants.gov/applicants/organization-registration/step-1-obtain-duns-number.html>.
- Cinwaanka xafiiska ugu wayn
- “U hawlgala ahaan” magaca (DBA)
- Cinwaanka codsadhaha iyo macluumaadka kale ee lagula xiriirayo
- Loogu Talagalay Meheradaha: Boqollayda lahaanshaha mulkiile shaqsiyeed kasta oo ku leh lahaansho in ka wayn 25%
- Loogu talagalay Milkiileyaasha kalidood leh: Wadarta qaddarka magdhawga dheefaha shaqo la'aanta la helay bishii Maarso 1, 2020 – Juun 30, 2020
- Diiwaangelinta lacago kale oo kasta ee lagu helay deeqaha loo maray deeqaha ama amaahda dowladda federaalka ee xeerka CARES Act
- U soocelinnada cashuurta dakhliga F ee sannadihii ederaalka 2017, 2018, iyo 2019 (siday kolba u khusayso)
- Dakhliga 2017, 2018, iyo 2019, dakhliga iyo kharashyada (kolba siday u khusayso)
- Dakhliga iyo kharashyada la filayo 2020, iyada oo la tixgalinayo saamaynta safmareenka COVID-19 ay ku leedahay dakhliga iyo kharashyada
- Qiyaasta iyo u dhawaynta khasaaraha dakhliga boqollay (%) ahaan ee sannadka 2020 ee si tooska ah ugu xiran ka soo dhegalka hawlagallada ee cudurka saba ahaan ah COVID-19 ama u falcelinta caafimaadka dadwaynaha ee la xiriirta
- W-9 elektiroonig ah oo la diyaariyay haddii ay dhacdo in meheraddaada/ururkaagu loo xusho deeq (<https://www.irs.gov/pub/irs-pdf/fw9.pdf>)

Soo-raacin 3:

Shuruudaha Qaybinta iyo Qaaciddada (Formula)

Deeqaha Ka Soo-kabashada Dhaqaalaha Maine ayaa lagu qaybin doonaa iyada oo lagu saleynayo meheradda/ururka oo soo ban dhigta khasaarihii bishii Janawari – Juun 2020 awgeed COVID-19 oo ah boqolkiiba in siman (pro-rated) ee wadarta khasaaraha inta lagu qiimeeyay ay sabab u tahay COVID-19 sida ay ay ka soo ewwarbixyeen dhammaan codsadyaasha uqalma isla muddadaas. Dhammaan qaddarrada deeqdu waxay ku xiran yihiin u fiirsiga iyo qiyaasta iyada oo ku xiran mugga codsada go'aankooda la sugayo iyo baaxadda khasaaraha laga soo warbixiyay. Qiime dhaca ayaa lagu darayn kharashyada.

Nidaamka iyo tusaale ayaa lagu sharraxayaa hoosta:

1. Xisaabi celceliska 6bil ee meheradda/ururka oo muddo saddex sanno ah. Wadarta dakhliga iyada oo lagu daro 2017, 2018, 2019 wax soogalka guud (dakhliga) oo loo qeybiyo 6 (ama tirada sannadaha buuxa ee jira meesha X 2):

$$\text{Risiiddo Celcelis 6bil} = \frac{2017 \text{ Risiiddo wadareed} + 2018 \text{ Risiiddo wadareed} + 2019 \text{ Risiiddo wadareed}}{6}$$

2. Xisaabi celceliska kharashyada 6bil ee meheradda/ururka oo muddo saddex sanno ah iyada oolagu daro kharashyada sannadaha 2017, 2018, 2019 oo loo qaybiyo 6 (ama tirada sannadaha buuxa ee jira meesha X 2):

$$\text{Kharashyo Celcelis 6bil} = \frac{2017 \text{ Kharashyo} + 2018 \text{ Kharashyo} + 2019 \text{ Kharashyo}}{6}$$

3. Kajar celcelinta. 6bil. Celcelinta Kharashyada. 6bil. Waxa soo galay (rissiddada) si loo helo celcelis 6bil ah. Dakhliga

$$\text{Celcelis 6bil} = \text{Celcelis 6bil. Risiiddo} - \text{Kharashyo Celcelis 6bil}$$

4. Hel dahliga meheradda/ururka 6dii bilood ee ugu horreysa ee 2020 adiga oo ka jara kharashyada risiiddada guud:

- a. Loogu Talagalay Meheradaha

$$\text{JanJuun Dakhli} = \text{Risiiddo wadareed} - \text{Kharashyada}$$

- b. Loogu Talagalay Kuwa Aan Maacaash-Doonka Ahayn

$$\text{JanJuun Dakhli} = \frac{2020 \text{ Maaliyaadda La Filayo} - 2020 \text{ Maaliyad Hawleedka La Filayo}}{2}$$

5. Xisaabi khasaaraha guud ee la filayo ee meheradda/ururka, adiga oo ka jara Dakhliga 6-bilood oo celcelis ah ee ka yimaad Jan – Jun Dakhliga ka dibna ku dhufanaya % khasaaha ka yimid sababta la xiriirta COVID-19. (Dakhligaaga Janawari illaa Juun ayaa noqon kara tabane, AGL-gaagu waa inuu noqdaa tabale).

$$\text{Khasaare Wadareedka La Filayo (AGL)} = \% \text{Khasaare COVID} * (\text{JanJuun Dakhli} - \text{Kharashyo Celcelis 6bil})$$

6. Ku yaree khasaaraha guud ee la filayo wax kasta aan loo xisaabin (aan wali al sheegan) ee ah Barnaamika Ilaalinta Mushaharka (UPPP), ee ah qaddarka la helay, qaddarka aan la shaegan ee dhammaan lacagaha kale ee dawladda dhexe laga

helay, iyo, mulkiileyaasha kalida ah markay tahay, guud ahaan magdhowga shaqo la'aanta ee la helay laga bilaabo Maarso 1, 2020 – Juun 30, 2020 ("Khasaaraha uqalama").

Khasaare U Qalme (QL)

$$= (AGL) + UPPP \text{ Dhammaan lacagaha federaal ee la helay} + \text{shaqolaanta}$$

7. Iskudar khasaarayaasha uqalma ee dhammaan meheradaha/ururrada ee codsaday ee qanciya shuruudaha uqalmitaanka ("wadarta khasaaraha uqalma").

Khasaare u Qalme Wadar (TQL)

$$= \Sigma QL \text{ (Loogu talagay meherad ama urur kasta oo uqalma)}$$

8. U qaybi wadarta fuuddada (fund) ee \$200M wadarta khasaaraha uqalma ("boqollayda siman (u qoondayn Boqollay (PRP) = $\frac{\text{Baaqi Lacageed Wadareed (USD)}}{\text{Khasare uqalan Wadareed (USD)}}$)

9. Ku dhufo boqollayda siman ee meheradda/ururka khasaaraha uqalma.²

$$\text{Qaddarka Deeqda} = \text{PRP} * \text{QL}$$

² Qaddarka ugu badan ee codsade ka heli karaa barnaamijkan barnaamijkan waa \$100,000. Qaddarka ugu yar waxa lagu qeexi go'aamin doona gebogebada muddada codsiga. Taas darteed, haddii qaddarka la xisaabiyey Tallabada 9 uu ka bato \$100,000, codsaduhu wuxu heli doona keliya ugu badnaan \$100,000. Haddii qaddarka la xisaabiyey tallabada 9 uu ka yaraado qaddarka ugu yar ee deeqda, codsaduhu ma heli doono wax lacag ah. Siyaabaha kale oo dhan, codsaduhu wuxu heli doonaa qaddarka lagu xisaabiyey Tallabada 9.

TUSAALE:

Makhaayadda The Wicked Good Diner ayaa ah makhaayad iyo bar yar oo helay Dakhli Guud oo \$650,000 ah sannadkii 2019, \$600,000 sannadkii 2018, iyo \$580,000. Makhaayadda The Wicked Good Diner ayaa ka warbixisay kharashyo ah \$560,000 sannadkii 2019, \$ 540,000 sannadkii 2018, iyo \$ 505,000 sannadkii 2017. Mulkiiluhu wuxuu qaatay Amaah Ilaalin Mushhar oo \$30,000 doollar oo lagaga caawinayo marxaladaha hore ee safmareenka, kuwaas oo ay ka harsan yihiin \$12,500 inay kharash gareeyaan. Illaa Juun 30, 2020, makhaayadda The Wicked Good Diner ayaa hoos u dhacay 28% Dakhligooda Guud sanadkii la soo dhaafay, oo risiiddo guud oo ah \$ 234,000. Mulkiiluhu wuxuu qaatay Amaah Ilaalin Mushhar oo \$30,000 doollar oo lagaga caawinayo marxaladaha hore ee safmareenka, kuwaas oo ay ka harsan yihiin \$12,500 inay kharash gareeyaan. Kharashyada makhaayadda The Wicked Good Diner illaa Juun 2020 ayaa ah \$248,000. Mulkiiluhu wuxuu ku qiyaasey in 95% khasaaraha ay sabab u tahay safmareenka COVID-19. Sidee ayay xisaabintu ugu qabsoomi doontaa makhaayadda The Wicked Good Diner?

1. $Risiiddo\ Celcelis\ 6bil = \frac{2017\ Risiiddo\ wadareed + 2018\ Risiiddo\ wadareed + 2019\ Risiiddo\ wadareed}{6}$
 $Risiiddo\ Celcelis\ 6bil = \frac{\$580,000 + \$600,000 + \$650,000}{6}$
 $Risiiddo\ Celcelis\ 6bil = \$305,000$
2. $Kharashyo\ Celcelis\ 6bil = \frac{2017\ Kharashyo + 2018\ Kharashyo + 2019\ Kharashyo}{6}$
 $Kharashyo\ Celcelis\ 6bil = \frac{\$505,000 + \$540,000 + \$560,000}{6}$
 $Kharashyo\ Celcelis\ 6bil = \$267,500$
3. $Dakhli\ celcelis\ 6bil. = Risiiddo\ celcelis\ 6bil. - Kharashyo\ celcelis\ 6bil$
 $Dakhli\ Hawlgal\ Celcelis = \$305,000 - \$267,500$
 $Dakhli\ Hawlgal\ Celcelis = \$37,500$
4. $Jan - Juun\ Dakhli = Risiiddo\ Wadar - Kharashyo$
 $Jan - Juun\ Dakhli\ Hawlgal = \$234,000 - \$248,000$
 $Jan - Juun\ Dakhli\ Hawlgal = \$14,000$
5. $Khasaare\ Wadareedka\ La\ Filayo\ (AGL) = \%Khasaare\ COVID * (Jan\ Juun\ Dakhli - Dakhli\ Celcelis\ 6bil.)$
 $Khasaare\ Wadareedka\ La\ Filayo\ (AGL) = 0.95 * ((-\$14,000) - \$37,500)$
 $Khasaare\ Wadareedka\ La\ Filayo\ (AGL) = -\$48,925$
6. $Khasaaraha\ Uqalma\ (QL) = (AGL) + UPPP + All\ other\ federal\ funds\ received$
 $Khasaaraha\ Uqalma\ (QL) = (-\$48,925) + \$12,500$
 $Khasaaraha\ Uqalma\ (QL) = (\$36,425)$
7. $Khasaare\ Wadareed\ Uqalma\ (TQL) = \Sigma\ QL\ (Loogu\ talagay\ meherad\ ama\ urur\ kasta\ oo\ uqalma)$
 $Khasaare\ Wadareed\ Uqalma\ (TQL)\ Meheradaha * \$75,0\ Celcelis\ Khasaare$
 $Khasaare\ Wadareed\ Uqalma\ (TQL) = \$1,125,00$
8. $U\ Qoondayn\ Boqollay\ (PRP) = \frac{Wadar\ Baaqi\ Fuundo\ (USD)}{Wadar\ Khasaare\ Uqalma\ (USD)}$
 $U\ Qoondayn\ Boqollay\ (PRP) = \frac{\$200,000,000\ (USD)}{\$1,125,000,000\ (USD)}$
 $U\ Qoondayn\ Boqollay\ (PRP) = 0.18$

9. $Qaddarka\ Deeqda = PRP * QL$
 $Qaddarka\ Deeqda = .18 * (\$36,425)$
 $Qaddarka\ Deeqda = \$6,557$